

**WARQADDA MACLUUMAADKA TALLAAL QAATAYAASHA IYO DARYEEL-BIXIYAYAASHA EE COMIRNATY
(TALLAALKA COVID-19, mRNA)
IYO TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER-BIONTECH EE LAGAGA HORTAGGO CUDURKA KORONA-FAYRAS
2019 (COVID-19)**

Waxaa lagu siinayaa COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 si looga hortago Cudurka Coronavirus 2019 (COVID-19) oo uu sababay SARS-CoV-2.

Warqaddan Xaqiiqda ah ee Macluumaadka Tallaal Qaatayaasha iyo Daryeel-bixiyayaashu waxay ka kooban tahay Xaashida Xaqiiqda ee loogu talagalay Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 waxaana sidoo kale ku jira macluumaad ku saabsan ruqsad haystayaasha tallaalka ee FDA, COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA).

COMIRNATY-ka FDA-ansixisay (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo FDA-idman Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 ee hoos imaanaya Ogolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) waxay leeyihiin qaab isku mid ah waxaana loo isticmaali karaa si isweydaarsi ah si loo bixiyo taxanaha tallaalka COVID-19.¹

COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) waa tallaalka FDA oggolaatay ee COVID-19 oo uu sameeyay Pfizer BioNTech.

- **Waxaa loo ansixiyay inay tahay taxane 2-qaddar laga qaadanayo oo loogu talagalay ka-hortagga COVID-19 ee shakhsiyaadka jira 16 sano iyo ka weyn.**
- **Waxa kale oo loo oggol yahay in EUA dhexdeeda lagu maamulo:**
 - **ka hortagga COVID-19 shaqsiyaadka 12 illaa 15 sano, iyo**
 - **siiyaan qadar saddexaad shakhsiyaadka 12 jirka ah iyo kuwa ka weyn ee la ogaaday inay leeyihiin nooc ka mid ah difaaca jirka oo daciif ah.**

Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 wuxuu ka helay ogolaansho EUA FDA:

- **in looga hortago COVID-19 shaqsiyaadka jira 12 sano iyo ka weyn, iyo**
- **siiyaan qadar saddexaad shakhsiyaadka 12 jirka ah iyo kuwa ka weyn ee la ogaaday inay leeyihiin nooc ka mid ah difaaca jirka oo daciif ah.**

Xaashidan Xaqiiqda ah ee Macluumaadka Tallaalka waxaa ku jira macluumaad kaa caawinaya inaad fahanto halista iyo faa'iidooyinka COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Pfizer-BioNTech COVID-19, oo laga yaabo inaad hesho maxaa yeelay hadda waxaa weli jira safmarka COVID-19. La hadal bixiyahaaga tallaalka haddii aad su'aalo qabto.

COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Pfizer-BioNTech COVID-19 Tallaalka waxaa loo maamulaa in la qaato 2-qaddar oo taxane ah, 3 usbuucna loo dhaxaysiiyo, muruqana laga qaato.

¹ Tallaalka ruqsadda loo haysto wuxuu leeyahay qaab la mid ah kan tallaalka EUA oggolaatay iyo badeecadaha loo isticmaali karo si is-weydaarsi ah si loo bixiyo taxanaha tallaalka iyadoon la soo bandhigin wax welwel ah xagga ammaanka iyo waxtarkiisaba. Badeecaduhu si sharci ah ayay u kala duwan yihiin iyadoo ay jiraan kala duwanaansho aan saamaynayn nabadgelyada ama waxtarka.

Siday dhigayso EUA, shaqsiyaadka la sheegey inay leeyihiin noocyada difaaca jirka ee daciifka ah qaarkood, qiyaas saddexaad ayaa la qaadan karaa ugu yaraan 4 toddobaad ka dib qiyaasta labaad.

COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 ayaa laga yaabaa inaysan qof walba ilaalin.

Xaashidan macluumaadka waa la cusbooneysiisay. Waraaqda Xaqiiqda ee ugu dambaysay, fadlan eeg www.cvdvaccine.com.

WAXAAD U BAAHAN TAHAY INAAD OGTAHAY INTAANAD TALLAALKAN QAADAN

WAA MAXAY COVID-19?

Cudurka COVID-19 waxaa sababa korona-fayras loo yaqaano SARS-CoV-2. Waxaad ku qaadi kartaa COVID-19 taabashada qof kale oo qaba fayraska. Badanaa waa cudur neefmareenka ku dhaca oo saameyn ku yeelan kara xubnaha kale. Dadka qaba COVID-19 waxaa laga soo sheegay astaamo badan oo kala duwan, laga bilaabo astaamo khafiif ah ilaa jirro daran oo geeri keeni karta. Astaamuhu waxay soo muuqan karaan 2 ilaa 14 maalmood ka dib marka uu kugu dhaco fayrasku. Astaamaha waxaa ka mid noqon kara: qandho ama qarqaryo; qufac; neef qabatin; daal; murqo ama jir xanuun; madax xanuun; dhadhanka ama urta oo kaa tagta; cune xanuun; cabudh ama duuf badan; lallabbo ama matag; shuban.

WAA MAXAY COMIRNATY (TALLAALKA COVID-19, mRNA) SIDEE AYUU ULA XIRIIRAA TALLAALKA PFIZER-BIONTECH EE COVID-19?

COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 waxay leeyihiin qaab isku mid ah waxaana loo isticmaali karaa si isweydaarsi ah si loo bixiyo taxanaha tallaalka COVID-19.²

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan EUA, fiiri qeybta “**Waa maxay Fasaxida Adeegsiga Degdegga ahi (EUA)?**” ee ku taala dhammaadka Xaashida Macluumaadka.

² Tallaalka ruqsadda loo haysto wuxuu leeyahay qaab la mid ah kan tallaalka EUA oggolaatay iyo badeecadaha loo isticmaali karo si is-weydaarsi ah si loo bixiyo taxanaha tallaalka iyadoon la soo bandhigin wax welwel ah xagga ammaanka iyo waxtarkiisaba. Badeecaduhu si sharci ah ayay u kala duwan yihiin iyadoo ay jiraan kala duwanaansho aan saamaynayn nabadgelyada ama waxtarka.

MAXAAD U BAAHAN TAHAY INAAD U SHEEGTO TALLAAL BIXIYAHAAGA KA HOR INTA AAN LAGU TALLAALIN?

U sheeg bixiyaha tallaalka dhammaan xaaladahaaga caafimaad, oo ay kamid yihiin haddii aad:

- leedahay wax xasaasiyado ah
- aad yeelatay myocarditis (barar ku dhaca muruqyada wadnaha) ama pericarditis (caabuq ku dhaca dahaarka ka baxsan wadnaha)
- leedahay qandho
- leedahay cillad dhiig-bax ama aad adeegsatid dhiig khafiifiye
- leedahay cillada nidaamka difaaca jirka ama aad qaadatid daawo saameyn ku leh nidaamka difaaca ee jirkaaga
- leedahay uur ama qorsheyntayso inaad uur yeelato
- naas-nuujinayso
- qaadatay tallaalka kale oo COVID-19 ah
- aad hore u miyir beeshay markii lagugu muday

YAA LOOGU TALOGALAY TALLAALKA?

FDA waxay oggolaatay COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) si loogu isticmaalo shakhsiyaadka jira 16 sano iyo wixii ka weyn waxayna u oggolaatay isticmaalka degdegga ah ee shakhsiyaadka 12 illaa 15 sano.

FDA waxay oggolaatay adeegsiga deg-degga ah ee Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 ee shakhsiyaadka jira 12 sano iyo ka weyn.

YAAN LOO OGOLAYN INAY QAATAAN TALLAALKA?

Waa inaad qaadan COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Pfizer-BioNTech COVID-19 haddii:

- aad leedahay xasaadiyad daran ka dib markii aad horey u qaadatay tallaalka
- ama aad fal-celin xasaasiyadeed oo daran ku yeelatay mid ka mid ah waxa uu tallaalkani ka kooban yahay.

WAA MAXAY WAXYAABAHA KU JIRA COMIRNATY (TALLAALKA COVID-19, mRNA) IYO TALLAALKA PFIZER-BIONTECH EE COVID-19?

COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 waxaa ku jira maaddooyinka soo socda: mRNA, dux ((4-hydroxybutyl) azanediyl) bis (hexane- 6,1-diyl) bis (2-hexyldecanoate) , 2 [(polyethylene glycol) -2000] -N, N- ditetradecylacetamide, 1,2-Distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine, iyo kolestarool), potassium chloride, monobasic potassium phosphate, sodium chloride, diasrate sodium phosphate dihydrate, iyo sucrose.

SIDEE LOO BIXINAYAA TALLAALKA?

COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 ayaa lagugu siin doonaa irbad muruqa lagaaga durayo.

Taxanaha tallaalka waa 2 qiyaasotalaal (qaddar) oo loo dhexaysiinayo 3 toddobaad.

Haddii aad qaadato hal talaal (qaddar), waa inaad heshaa qiyaasta labaad ee tallaalka 3 toddobaad ka dib si aad u dhammaystirto taxanaha tallaalka.

COMIRNATY (TALLAALKA COVID-19, mRNA) IYO TALLAALKA PFIZER-BIONTECH EE COVID-19 MIYAA HORE LOO ISTICMAALAY?

Tijaabooyinka caafimaad, ku dhowaad 23,000 oo qof oo 12 sanno jir ah ama ka weyn ayaa qaatay ugu yaraan 1 qaadasho oo ah tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech. Xogta laga helay tijaabooyinkan caafimaad ayaa lagu taageeray Ogolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah ee Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 iyo oggolaanshaha COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA). Malaayiin qof ayaa qaatay Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 ee hoos yimaada EUA laga soo bilaabo Diseembar 11, 2020.

WAA MAXAY FAA'IIDOOYINKA COMIRNATY (TALLAALKA COVID-19, mRNA) IYO TALLAALKA PFIZER-BIONTECH EE COVID-19?

Tallaalka ayaa laga arkay inuu ka hortagayo COVID-19 iyadoo la qaadanayo 2 jeer oo loo dhexaysiinayo 3 toddobaad. Muddada uu qofka ka ilaalinayo COVID-19 hadda lama ogga.

WAA MAXAY KHATARAHA COMIRNATY (TALLAALKA COVID-19, mRNA) IYO TALLAALKA PFIZER-BIONTECH EE COVID-19?

Waxaa jira fursad yar oo ah in tallaalku keeni karo falcelin xasaasiyadeed oo aad u daran. Fal-celinta xasaasiyadeed ee daran ayaa sida caadiga ah dhacda dhowr daqiiqo ilaa hal saac ka dib marka la qaato qiyaasta (qaddarka) tallaalka. Sababtaas awgeed, bixiyaha tallaalka ayaa kaa dalban kara inaad joogto meesha aad ka qaadatay tallaalka si xaaladaada loola socdo.

Calaamadaha fal-celinta xasaasiyadeed ee daran waxaa ka mid noqon kara:

- Neefsashada oo adkaata
- Bararka wejigaaga iyo cunahaaga
- Wadne garaac degdeg ah
- Finan xun oo jidhkaaga oo dhan ka soo baxa
- Dawakhaad iyo daciifnimo

Myocarditis (caabuuq ku dhaca muruqyada wadnaha) iyo pericarditis (caabuuq ku dhaca dahaarka ka baxsan wadnaha) ayaa ku dhacay dadka qaarkood oo qaatay COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19. Inta badan dadkan, astaamuhu waxay bilaabmeen dhawr maalmood gudahood ka dib markii ay qaateen tallaalka labaad. Fursadda ah inay tan dhacdo waa mid aad u yar. Waa inaad isla markiiba raadsataa daryeel caafimaad haddii aad leedahay mid ka mid ah calaamadaha soo socda ka dib markii aad qaadatay tallaalka:

- Laab xanuun
- Neefta oo kugu yaraata
- Dareenka garaaca wadnaha oo degdeg ah, dhaqaaqaya, ama si xoog ah u garaacmaya

Dhibaatooyinka kale ee laga soo sheegay COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 waxaa ka mid ah:

- falcelin xasaasiyadeed oo daran
- fal-celin xasaasiyadeed oo aan daranayn sida finan, cuncun, xoqxoqan, ama wejiga oo barara
- myocarditis (bararka muruqyada wadnaha)
- pericarditis (caabuuq dahaarka ka baxsan wadnaha)
- xanuunka goobtii lagaa duray
- daal
- madax-xanuun
- murqo xanuun
- qarqaryo

- xanuunka kala-goosyada
- xummad
- bararka goobta muditaanka
- guduudashada goobta muditaanka
- lallabbo
- dareemid caafimaad darro
- qanjirada oo barara (lymphadenopathy)
- shuban
- matagid
- cudud xanuun

Kuwani ma noqon karaan dhammaan waxyeellooyinka suurtagalka ah ee tallaalka. Dhibaatooyin daran oo lama filaan ah ayaa dhici kara. Dhibaatooyinka suurtagalka ah ee tallaalka ayaa weli lagu baranayaa tijaabooyinka caafimaad.

MAXAAN KU SAMEEYAA WAXYEELLOOYINKA WEHELIYA?

Haddii aad isku arragto fal-celin xasaasiyadeed oo daran, wac 9-1-1, ama tag cisbitaalka kuugu dhow.

Wac bixiyaha tallaalka ama bixiyaha daryeelkaaga caafimaad haddii aad qabtid waxyeellooyin weheliya oo ku dhibaya ama haddii aysan tagin.

Ka warbixi waxyeellooyinka weheliya ee tallaalka FDA/CDC iyo Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS). Lambarka lacag la'aanta ah ee VAERS waa 1-800-822-7967 ama internetka ku soo wargeli <https://vaers.hhs.gov/reportevent.html>. Fadlan ku dar "COMIRNATY (COVID-19 Vaccine, mRNA)" ama "Pfizer-BioNTech COVID-19 Vaccine EUA", sida ku habboon, safka hore ee sanduuqa #18 ee foomka warbixinta.

Intaas waxaa dheer, waxaad waxyeellooyinka weheliya tallaalka ugu soo gudbin kartaa Pfizer Inc. macluumaadka xiriirka ee hoos ku qoran.

Bogga internetka	Lambarka faakiska	Lambarka taleefanka
www.pfizersafetyreporting.com	1-866-635-8337	1-800-438-1985

Waxa kale oo lagu siin karaa ikhtiyaar aad iskaga diiwaangeliso v-safe. V-safe waa aalad cusub oo ikhtiyaari ah oo ku saleysan taleefanka casriga ah ee adeegsada farriinta qoraalka iyo sahannada shabakadda si ay u hubiso in la aqoonsado waxyeellooyinka imaan kara tallaalka COVID-19 ka dib. V-safe wuxuu ku waydiinayaa su'aalo ka caawinaya CDC la socodka badbaadada tallaalka COVID-19. V-safe waxay kaloo bixisaa xusuusiyeyaasha qaddarka labaad haddii loo baahdo iyo dabagalka taleefanka tooska ah ee CDC haddii ka-qaybgalayaashu soo sheegaan saameyn caafimaad oo weyn tallaalka COVID-19 ka dib. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan sida la isu diiwaangeliyo, booqo: www.cdc.gov/vsaf_e.

MAXAA DHACAYA HADDII AAN GO'AANSADO IN AANAN QAADAN (TALLAALKA COVID-19, mRNA) AMA TALLAALKA PFIZER-BIONTECH COVID-19?

Sida ay dhigayso EUA, waa adiga ikhtiyaarkaaga inaad qaadato ama aadan qaadan tallaalka. Haddii aad go'aansato inaad qaadan, ma beddeli doonto daryeelkaaga caafimaad ee caadiga ah.

DOORASHOYIN KALE MA JIRAAN OO LAGAGA HORTEGI KARO COVID-19 MARKA LAGA YIMAADO COMIRNATY (TALLAALKA COVID-19, mRNA) AMA TALLAALKA PFIZER-BIONTECH EE COVID-19?

Tallaalada kale ee looga hortagayo COVID-19 waxaa laga heli karaa Oggolaanshaha Adeegsiga Degdegga ah.

MIYAAN QAADAN KARAA COMIRNATY (TALLAALKA COVID-19, mRNA) AMA TALLAALKA PFIZER-BIONTECH COVID-19 ISKU WAQTIGA SIDA TALLAALADA KALE?

Macluumaadka weli looma soo gudbin FDA oo ku saabsan maamulka COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 isla waqtiyada tallaalada kale. Haddii aad ka fekereyso inaad hesho COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 oo leh tallaallo kale, kala hadal fursadahaaga bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

MAXAA DHACAYA HADDII DIFAACAYGU DACIIF YAHAY?

Haddii difaacaagu daciif yahay, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo qiyaasta (qaddarka) saddexaad ee tallaalka. Qiyaasta saddexaad ayaa laga yaabaa inaanay weli ku siinin difaac buuxa oo COVID-19 ah dadka difaacoodu daciifka yahay, waana inaad sii wadataa ilaalinta taxaddarrada jirka si aad uga hortagto COVID-19. Intaa waxaa dheer, dadka aad isku dhow dihiin waa in la tallaalo sida ugu habboon.

MAXAA DHACAYA HADDII AAN UUR LEEYAHAY AMA AAN NAAS-NUUJINAYO?

Haddii aad uur leedahay ama aad naas-nuujinayso, xulashooyinkaaga kala hadal bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka.

MIYUU TALLAALKA COMIRNATY (COVID-19 TALLAALKA, mRNA) AMA TALLAALKA PFIZER-BIONTECH EE COVID-19 UU I QAADSIIN DOONAA COVID-19?

Maya. Tallaalka kuma jiro SARS-CoV-2 mana ku qaadsiin karo COVID-19.


HEYSO KAARKAAGA TALLAALKA

Markaad hesho qiyaastaada koowaad, waxaad heli doontaa kaarka tallaalka si uu kuu tuso goorta aad u soo noqonayso qaddarkaaga labaad ama haddii aad leedahay nooc ka mid ah difaaca jirka, qiyaastaada saddexaad ee COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID -19. Xusuusnow inaad soo qaadato kaarkaaga marka aad soo noqonayso.

XOG DHEERAAD AH

Haddii aad su'aalo qabtid, booqo mareegaha ama wac lambarka taleefanka ee hoos ku qoran.

Si aad u hesho Xaashiyaha Macluumaadka ee ugu dambeeyay, fadlan sawir koodka QR ee hoos ku qoran.

Bogga internetka ee caalamiga ah	Lambarka taleefanka
<p data-bbox="370 218 630 245">www.cvdvaccine.com</p> 	<p data-bbox="1024 289 1243 352">1-877-829-2619 (1-877-VAX-CO19)</p>

SIDEE AYAAN WAX BADAN KU OGGAAN KARAA?

- Weydii bixiyaha tallaalka.
- Booqo CDC-ga <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html> .
- Halkan ka booqo FDA <https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/mcm-legal-regulatory-and-policy-framework/emergency-use-authorization>.
- La xiriir waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama gobolkaaga.

XAGGEE LAGU QORI DOONAA MACLUUMAADKA TALLAALKAYGA?

Bixiyaha tallaalku wuxuu ku qori karaa macluumaadka tallaalkaaga Nidaamka Macluumaadka Tallaalka (IIS) ee maamulka gobolkaaga/degmadaada ama nidaamka kale ee loogu talagalay. Tani waxay xaqiijin doontaa inaad hesho isla tallaalkaas marka aad ku soo laabato qaadasho labaad. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan IISs booqo: <https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/about.html> .

MIYAA LA IGA QAADI KARAA KHARASHKA SIINTA TALLAALKA COVID-19?

Maya. Wakhtigan, adeeg bixiyaha kuguma soo dallaci karo kharashka tallaalka lagaamana qaadi karo khidmadda bixinta tallaalka ee ka baxsan amaba kharash kale haddii aad qaadato tallaalka COVID-19. Si kastaba ha ahaatee, bixiyeyaasha tallaalka ayaa laga yaabaa inay lacag-celin ku habboon ka raadsadaan barnaamij ama cayniska bixiya khidmadaha tallaalka COVID-19 ee qaataha tallaalka (caymiska gaarka ah, Medicare, Medicaid, Khayraadka Caafimaadka & Maamulka Adeegyada [HRSA] COVID-19 Barnaamijka aan caymis lahayn ee qaatayaasha bilaa caymiska ah).

HALKEE AYAAN U GUDBINAYAA KHASAARAH KA DHASHA HADII QIYAANO LA II SHEEGAY?

Shakhsiyadka ka warhaya xadgudubyada suurtagalka ah ee shuruudaha Barnaamijka Tallaalka ee CDC ee COVID-19 waxaa lagu dhiirigelinayaa inay u soo sheegaan Xafiiska Kormeeraha Guud, ee Mareykanka. Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha, ee 1-800-HHS-TIPS or <https://TIPS.HHS.GOV>.

WAA MAXAY BARNAAMIJKA LOOGU TALOGALAY MAGDHAWGA DHAAWACYADA?

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Ka -hortagga (CICP) waa barnaamij federaal ah oo laga yaabo inuu kaa caawiyo bixinta kharashaadka daryeelka caafimaadka iyo kharashaadka kale ee gaarka ah ee dad gaar ah oo ay dhaawacyo daran u geysteen daawooyinka ama tallaallada qaarkood, oo uu ku jiro tallaalkani. Guud ahaan, sheegashada waa in loo gudbiyaa CICP hal (1) sanno gudahii laga bilaabo taariikhda tallaalka la qaatay. Si aad wax badan uga ogaato barnaamijkan, booqo www.hrsa.gov/cicp/ ama wac 1-855-266-2427.

WAA MAXAY FASAXIDA ADEEGSIGA DEGDEGGA AH (EUA)?

Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) waa farsamo lagu fududeynayo helitaanka iyo adeegsiga alaabada caafimaadka, oo ay ku jiraan tallaalka, inta lagu jiro xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha, sida masiibada hadda jirta ee COVID-19. EUA waxaa taageera Bayaanka Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) in duruufaha jira ay qiil u yihiin adeegsiga degdegga ah ee daawooyinka iyo badeecooyinka bayoolojiga inta lagu gudajiro aafadda/safmareenka COVID-19.

FDA ayaa soo saari karta EUA marka shuruudaha qaarkood la buuxiyo, kuwaas oo ay ku jiraan marka aysan jirin ikhtiyaaro kale oo wanaagsan, oo la aqbali karo lana heli karo. Intaas waxaa dheer, go'aanka FDA wuxuu ku saleysan yahay caddeynta cilmiyaysan ee dhameyska tiran lana heli karo ee muujineysa in badeecadu ay waxtar u yeelan karto ka hortagga COVID-19 inta lagu gudajiro aafadda COVID-19 iyo in faa'iidooyinka la og yahay iyo kuwa suurtagalka ah ee badeecadu ay ka culus yihiin waxyeelada la ogyahay iyo khatarta suurtagalka ah ee badeecada. Dhammaan shuruudahan waa in la buuxiyo si loogu oggolaado in badeecada loo isticmaalo daaweynta bukaannada inta lagu jiro aafadda COVID-19.

EUA-daan loogu talagalay Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID-19 iyo COMIRNATY wuxuu dhammaan doonaa marka Xoghayaha HHS go'aamiyo in duruufaha keenaya qiilka EUA ay meesha ka baxaan ama marka isbeddel lagu sameeyo xaaladda oggolaanshaha ee sheyga si EUA aan mar dambe loo baahnayn.



Waxaa Sameeyay
Pfizer Inc., New York, NY 10017

BIONTECH

Waxaa loo sameeyay
BioNTech Manufacturing GmbH
An der Goldgrube 12
55131 Mainz, Germany

LAB-1451-7.2

Dib u eegid lagu sameeyay: 23 Ogosto 2021



Iskaanka mari si loo ogaado in Xaashidan
Macluumaadka ee la siiyay tallaalka qaataha, in loogu
talagalay nidaamka elektaroonigga ah ee diiwaanka
caafimaadka/nidaamyada macluumaadka tallaalka.

Taariikhda Barkoodhka: 08/2021